


# OGEYSIIS

## Barnaamijka isdhaafsiga iyo ka soo saarista hawo qaboojiyaha daaqada: tallaabooyinka xigga



Innagoo ammaanka danaynayna, Guriyeynta Jaaliyadda Toronto (Toronto Community Housing) hadda wixii ka dambeeya kireystayaasha uma oggolaanayno inay guryahooda ku rakibtaan hawo qaboojiyaha (air conditioners) daaqada.



Waxaan adeegsanaynaa qaab aan ku wajahayno oo aan uga saarayno dhammaan dhismooyinka oo dhan wixii hawo qaboojiye daaqada ah oo dhan. Kireystayaasha ugu dhegan hawo qaboojiyaha daaqada ee anaga aan ka saarno waxay ku beddelan karaan mid sagxada guriga la dhigto oo wax qarash ah aan ugu baxayn.

Kadib markii aan qaadnay tallaabooyin firfircoон inta lagu jiray xilligan jiilaalka si aan u saarno hawo qaboojiyaha daaqada oo aan ku jirin balkooniga, waxaan iminka aan ku casuumaynaa qoysaska horeyba uga saaray hawo qaboojiyaha daaqada inay nagu soo biiraan barnaamijka is-dhaafsiga.

Kireystayaashan waxay soo wici kara **416-981-5500** ama iimeel ku soo diri karaan [help@torontohousing.ca](mailto:help@torontohousing.ca) si hawo qaboojiyahooda ay iska saareen ama laga saaray ugu beddeshaan mid sagxada guriga la dhigto oo wax qarash ah aan ugu baxayn.

Shaqaalaha Guryanta Jaaliyadda Toronto (Toronto Community Housing) ayaa dhismahaaga iman doono toddobaadyada soo socda si ay kaaga caawiyaan inaad magacaaga ku darto dadka la siinayo ama helaya hawo qaboojiye nooc sagxada la dhigto oo qaadmaya. Dhowaan ayaa la soo dhejin doonaa taariikhda iyo saacaddaha shaqaalaha ay dhismahiina iman doonaan.

Dhamman isdhaafsiga oo dhan waxay qabsoomi doontaa xilliga qaboojiyaha loogu talagalay ee 2020.

Kireystayaasha ilaa iyo hadda haysta hawo qaboojiyaha daaqada ee ugu rakiban balkooniga dhexdiisa uga yaala way sii wadan karaan inay sii isticmaalaan ilaa ogeysiis dambe.

Haddii aad su'aalo qabtid, Xarunta Daryeelka Macaamiisha (Client Care Centre) kala xiriir [help@torontohousing.ca](mailto:help@torontohousing.ca) ama **416-981-5500**.



Si aad u codsatid qoraalkan oo qaab kale u qoran ama mid la tarjumay, fadlan la xiriir Xarunta Daryeelka Macaamiisha adigoo ka wacaya lambarka taleefanka ee kor ku qoran ama cinwaanka iimeelka.